Adeegan waa lacag la'aan, qarsoodi, iyo ka madaxbanaan maamullada sida isbitaalka, ururada maal geliya adega, ha'yadaha dowladda, iyo guddiga Caafimaadka iyo Curyaamada. In kastoo ay kulligood ay hoos imaanayaa qodobka sharciga u yaal Guddiga Caafimaadka iyo Curyaamada, adeega doodayaasha wuxuu wargeliyaa Agaasimaha Doodayaasha Madaxabanaan.

Doodayaasha waa kuwa ugu wanaagsan oo xaliya dacwooyinka, isla markaasna waa sida ugu fudud oo ay dacwaada lagu xaliyo kana fudud kuwii aan hore u soo sheegnay.

... ama Guddiga Caafimaadka iyo Curyaamada?

Guddiga waxaa uu eegayaa dacwo kasta oo loo soo gudbiyey kana gaarayaa go'aan ah in ay tahay qasab ama ku haboon tahay in talaabo laga qaado. Goortaas ayaa dhici karta in Guddiga:

- Uu u gudbiyo dacwada doodayaasha ku taqasusay arrimaha caafimadka iyo curyaamada si ay u xaliyaan dacwada;
- In ay dib ugu celiyaan adeegihii qofka maamulayey si ay dacwadan u xaliyaan;
- In ay u gudbiyaan dacwada ha'yad kale sida Wasaaradda Caafimaadka, ama xukunka guddiga taqtarada, Guddiga Ilaalinta xuquuqda qofka ama Kormeeraha Caafimadka Maskaxda ee degmada; ama
- In la baaro arrinta dhacday, dacwooyin aad u kooban ayaa Guddiga uu dhici karaa in uu go'aan ka gaaro inuu ku sameeyo baaritaan. Baaritaankaasi waxaa uu qaadan karaa waqti sabstoo ah Guddiga midna ma xigsanayo oo waxaa oo wareysi la yeelanaya labada dhinacba. Dacwooyinka la baaro badidood ma dhacdo in ay noqdaan mid sharciga lagu xadgudbay.
- Waa ay suurobi kartaa inaad la yeelato goor kasta xiriir Guddiga ilaa arrintaada laga xaliyo. Waxaa kaloo kuu suuroobi karta in laguu tafaftiro sida uu Guddiga uu dacwadaada uu maamulayaan iyo go'nka ay ka gaareen dacwadaada.

Miyeey dhici kartaa in la ciqaabo adeegaha haddi xuquuqdayda lagu xad gudbay?

Goor kasta oo ay dhacdo xadgudub xuquuqda sharciyada qofka oo uu baaritaanka Guddigasi qabo inay qalad tahay Guddigasi waxaa ay u gudbinayaa dacwada Agaasimaha sii Gudbinta (Director of Proceedings). Talaabadan waxaa lagu qaadaa keliya dacwooyin aad u kooban. Agaasimaha waa doode madaxbanaan oo dacwadiisu u gudbin kara Guddiga taqtarada madaxbanaan (Health Practitioners Disciplinary Tribunal) ama Guddiga Xuquuqda Biniadmiga Ilaaliya (Human Rights Review Tribunal), ama labadaba.

Wixii warbixin ah oo ku saabsan waxaa uu qabto Agaasimaha sii Gudbinta (Director of Proceedings) iyo kiisakii ay ka soo shaqeeyeen waxaa ka heli kartaa bogga Internetka ee HDC.

Miyaan helayaa xaqsiin haddii xuquuqdayda lagu xad gudbay?

Guddiga ma uu laha wax awood ah uu ku bixiyo xaqsiin. Adeegayaasha dacwada ku socotay ayaa waxaa dhici karta si ay u xaliyaan dacwada in ay ku siiyaan xaqsiin. Isticmaalayaasha adeegan qaarkood waxay xaq u yeelanayaan xaqsiinta ACC haddii nabarka ku dhacay uu yahay mid daawada lasiiyey u sabab tahay. Duruufo aad u kooban, ayaa waxaa lagu xaqsiiyaa HRRT.

Warbixino Iyo Goobo Kale Oo Aad La Xiriiri Karto

Haddii aad u baahato warbixin iyo caawimaad kale, ma aad damacdo inaad qabanqaabiso tababaro oo ku saabsan habdhiska sharciyada aad xaqa u leedahay, ama u baahantahay warbixin ku saabsan habka laysku daafaco ama loo dacwoodo, la soo xiriir:

Adeega Doodayaasha ee Waddanka

0800 555 050

Fax lacag la'aanta ah 0800 2787 7678

advocacy@hdc.org.nz

Guddiga Caafimaadka iyo Curyaamada

PO Box 1791, Auckland

Auckland ph/TTY (09) 373 1060

Wellington (04) 494 7900

Qaybaha kale ph/TTY 0800 11 22 33 | Fax (09) 373 1061

Email hdc@hdc.org.nz | Bogga Internetka www.hdc.org.nz

Fadlan soo codso haddii aad doonayso inaad qareen ama u-doode kala hadasho xogta qaxootiga/soo-galootiga.

Somali

Nationwide
Health & Disability Advocacy
Nga Kaitautoko

Sharciyada xuquuqda aad leedahay goorta aad u baahato gargaarka caafimaadka iyo kan curyaamada ee New Zealand iyo habka loo dacwoodo.

A service provided under the Health & Disability Commissioner Act 1994.
www.hdc.org.nz

Habdhiska Sharciyada Aad Xaqa U Leedahay

Waxaad xaq u leedahay

Qof kasta oo isticmaalaya gargaarka caafimadka ama kan curyaamadaba waxaa difaacaya sharciyada habdhigga. Guddi madaxbanaan ayaa soo bandhigaya isla markaana ilaalinaya xuquuqda u yaal sharciga waddanka New Zealand ee la yirahado sharciga Caafimadka iyo Gargaarka Curyaamada Qodobka 1994.

Xaqa aad leedahay goorta aad isticmaleysid gargaarka caafimaadka ama kan curyaamada.

Habdhigga sharciyada waxaa uu ku siinayaa 10 xaqood. Kuwaasi waxay kala yihiin:

1. In xushmad qofka lagula dhaqmo.
2. In qofka lagula dhaqmo si xaq ah la saarin masuuliyad culus ama laga eexan.
3. In la ilaaliyo damiirka iyo xornimada qofka uu leeyahay.
4. In la siiyo gargaar qiimo badan, isla markaasna lagula dhaqmo xanaaneyn iyo xirfad qibradeed.
5. In si buuxda loo faahfaahiyo warbixinada lagu siinayo si aad u fahanto micnahooda taasi waxay kugu caawineysaa xiriirka is fahanka adiga iyo qofka gargaarka ku siinaya.
6. In laguu faahfaahiyo wixii warbixin ah oo aad u baahan tahay oo ku saabsan caafimaadkaada ama curyaanimadaada; gargaarka lagu siinayo iyo magacyada shaqaalaha iyo shaqada ay qabtaan; iyo arrin kastoo warbixin ah oo ku saabsan shaybaar iyo daaweyn oo aad u baahato iyo natiijada shaybaarkaada ka soo baxday. Waddankan New Zealand waxaa dadka lagu dhiiri geliyaa in ay su'aal weydiiyaan goor kasta si ay u fahmaan arrintooda meesha ay mareyso.
7. Xornimo inaad u haysato go'aan aad ka gaari karto gargaarkaada, iyo inaad dib aga noqon karto ama is bedeli karto.
8. Inaad heysato qof ku siiya gargaar waqtiga badidiisa.
9. Si aad u hesho xuquuqyadan aan soo sheegnay waa haddii lagu weydiisto inaad ka qayb qaadato baaritaanka aqoon kororsiga ama barista duruusta ee loogu tala galay shaqaalaha la tababarayo.
10. Inaad xaq u leedahay inaad dacwooto iyo in dacwadaada la tixgeliyo.

Sida Loo Dacwoodo Iyo Sida Loo Xaliyo

Maxaan sameyn karaa haddi aan walwalsanahay ama aanan ku faraxsaneyn habka uu shaqaalaha u shaqeynayo, ama qalad hadduu dhaco, iyo haddii uu i galo dareen ah in laygu xad gudbay? Waxaad sameeyn kartaa:

- La hadal qofka gargaarkan kula soo xiriirsiiyey, ama qofka xukuma, waxaa dhici karta inay iyaga xalin karaan dhibaatada jirta;
- La xiriir reerkaada ama saaxiibadaa si ay kuula taliyaan ama kuugu caawiimaad sidii aad arrimaha ku haysta ugu soo bandhigi lahayd maamulka gargaarkan;
- Ka raadso caawinaad doodayaasha [avokato] madaxbanaan si uu kaaga caawiyo arrimaha ku walwal gelinaya. Habka loo raadsado doodaha ku taqasusey arrimaha caafimaadka iyo curyaamada warbixintiisa waxaad ka heleysaa bogga kale ee warqaddan fasiraadda dambeedkeeda.

Sababta aan u dacwoonayo

Sababta ay muhiim u tahay in la dacwoodo waxaa ku jira wanaaga shaqada oo ay shaqaalaha hayaan. Badi dadka aan maamulno oo dacwada soo gudbiya waxaay cadeeyaan in aysan dooneyn arrintii iyaga ku dhacay inuu qof kale tu la mid ah ku dhicin. Goor kasta qofkii dacwooday waxaa uu cadeeyaa inay wanaagsaneyd in dacwadiisii uu gudbiyey isla markaasna uu helay faahfaahin buuxda iyo raalli geliynba. Badi dadka fidiya adeega waxay u arkaan iney muhiim tahay in la ogaado waxa uu qofka loo adeegayo uu tirsanayo si ay arrintaasi uga hor tagaan. Mararka qaarkood waxay arrintani suuro gelisaa in ay dhacdo in la bedelo nooca maamulka uu u shaqeeynayo iyadoo markasta la eegayo sida ugu wanagsan ee lagu maamuli lahaa dadka aan u adeegno. Dadka aan u adeegno waxaay u arkaan in ay aad u wanaagsan tahay la socodsiiyo habka maamulkan uu u wanaajin doono adeegooda.

Sida loo dacwoodo

Waxaad xaq u leedahay inaad ka dacwooto adeegaha una gudbiso sida adiga kuugu fudud. Waxaad dacwadaada ku gudbin kartaa adigoo la hadlaya, oo hor taagan ama telefoon; ama adigoo dacwadaada ku gudbinaya qoraal warqada ah, fax ama email.

Waxaad dacwadaada u gudbineysaa goobahan;

- Qofka ama dadka aad ka dacwooneysid;
- Qof kale oo adeegayasha ka mid ah, caawiye ama urur masuuliyadiisa tahay inuu dacwooyinka maamulo (bil matalan maamulaha ama adeegaha dacwo qaadyaasha ee isbitaalka ama ururka);
- Doode ku taqasusuey caafimaadka iyo curyaamada oo aan ka tirsaneyn maamulka;
- Guddiga Caafimaadka iyo Curyaamada.

Haddii aan dacwoodo maxaan ka filan karaa

... dadka fidiya adeegan

Qof kasta oo ka mid ah adeegayaasha waa in ay dhagestaan arrimaha ku walwalgelinaya, kuuna micneeyaan habka loo dacwoodo iyo arrinta dacwadaada meesha ay mareyso. Waxaa dhici karta in dacwadaada la xaliyo isla markaasba, oo lagu siiyo wixii tafaftir ah ee ku saabsan go'aankii la gaaray, iyo talaabooyinkii laga qaadilahaa go'aankii dacwadaada.

... ama doodaha caafimadka iyo curyaamada?

Doode ku taqasusay caafimaadka iyo curyaamada oo ka tirsan Ururka Doodayaasha ee Waddanka waxaa uu kaa dhageysanayaa dacwadaada isla markaana kuu sharaxayaa inta dariiqo oo kuu furan oo xalin karta arrintaada. Doodaha waxaa uu xigaa dhinaca qofka dacwoonaya waxaana uu goor kasta kugu caawinayaa inuu kugu toosiyo go'aankii xalin lahaa arrimahaada.